

Lacagta shaqola'aanta: sharciga cusub oo ku saabsan firfircoonida 1.1.2018 laga bilaawo

Macaamilkeena wanaagsan,

Warqadaan waxaan niigu sharxeynaa lacagta shaqola'aanta saa loo bedeley 2018.

Sharuudaha laguugu siinaayo lacagtaas waxaa lagu dharey intaa ahaatit qor firfircoon oo shaqo raadsanaayo . Marka intaa shaqeynit waaye, intaa si ganacsi u shaqeesid waaye ama intaa wax kale sameesid waaye oo shaqola'aantaada beleyso. Tusaale ahaan intaa aadid xafiiska shaqolaanta oo skool digatit.

Kela aa bixineyso lacagta shaqola'aanta marka Kela wey lasoceysaa firfircoonidaada.

Firfircooni mahaa loola jeedaa

Kela waxey la soconeysaa firfircoonidaada 65 maalin. Firfircoodaada waxey ku filantahey markaa lixdan iyo shantaas maalin waxaan hoos ku qoron aad midkood sameysid:

- Intaa saqeynit waaye 18 saac. Mushaarkaada intuu ahaado waaye uguyaraan 6,91€/saacadii. Dadka macalinnimo ku shaqeynaayaan, guri ka shaqeynaayaan ama kua orodoyahanka ah si kale aa loo fiirinaayaa firfircoonidooda.
- Intaa si ganacsi ah intaa ku heshid waaye uguyaraan 241,04€
- Intaa kaqeybgashid maaye 5 maalin wax shaqola'aantaada saacideyso sida skool oo kale
- intaa kaqeybgashid waaye 5 maalin xafiiska shaqola'aanta qudbadhooda oo shaqola'aanta laga hadlaayo.
- Intaa sameysid waaye 5 maalin wax oo kuugu saacidaayo intaa shaqo heshid. Markaasna lacagtaada si caadi ah ey kuugu soconeysaa

Sida aad firfircoonidaa aad u fulineysid inoo soo sheeg markaad lacagta dalbaneysid www.kela.fi/asiointi.

Sidaan uu sharcigaan cusub u belelaayaa lacagtaada hadii aadan firfircooneyn

Lacagtaada shaqola'aanta ma yaraaneyso hadii aad sharuudaha kor lagu sheegey midkood hadaad sameysid.

Hadii firfircoonidaada 65 taas maalin eysan ku filneyn, lacagtaada shaqola'aanta waxey yaraaneynaa 4,65%. Waxaa laga jaraayaa lacagta lugu siindoonaa lixdan iyo shanta maalin soo socoto. Tusaale ahaan: hadii aad heshid 32.40€/maalintii, markaa lacagta layareeyo waxey noqoneysaa 30.89€/maalintii. Waxey lamidtahey hal maalin lacagteeda oo bishii lagu siinin.

Marka ey firfircoonidaada ey kuugu filantahey, lacagtaada si caadi ah ey kuugu soconeysaa. Markeysan firfircoonidaada kuugu filneen, lacagta lugu siin doono bisha dambey aa laga jaraayaa. Xadii aadan waxna qaban, bil kasto lacagtaada buuxdo waxaa laga jaraayaa 4,65%.

Yaanan laga rabin firfircooni dheeraad ah

Qof kasto loogama baahno sharuudhahaan kor ku qoran intuu fuliyo.

Adiga lagaagama baahno firfircooni hadii aad:

- Hadii shaqadii aad ka shaqeyneysey lagaasoo buriyo ama aa lacagta shaqola'aanta aa heleesid 65 maalin kayar

- hadii aah dalbatey lacagta hoolgabdiga aadan helinna goaan
- hadii aad guriga ku heysid qof xanuusan oo qaraabadhaada ah
- hadii aad hishid lacagta xanuunka aadan shaqeynkarinna

Macluumaad dheeraad ah:

Intaa Kela la soo xiriirtid ma'ahan warqadaan aawadheeda. Waxaa kuugu filan intaa hadda laga bilaawo intaa firfircoonidhaada u muujisid ama intaa cadeysid firfircoonidaada Kela marka aad lacagta soo dalbaneysid bil kasto.

Firfircoonidaaha inta ey mareyso waxaad kala soconkartaa pagekaan www.kela.fi/asiointi bisha sedaxaad dhamaadkeeda wixi ka bilaawato-

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacagaha intey yaraanaayaan hadii aadan firfircooni muujin waxey ku qorantahey www.kela.fi/tyottomat.

Wixii kuugu saacidaayo intaa shaqo heshid waxey ku qoranyihiin www.kela.fi/tyollistymista-edistavat-toimenpiteet.

Si daacadnimo ah,

Kela